

Dugsiga Dadweynaha ee Buffalo waxaa ka go'an inay qoysaska iyo shaqaalaha siiyaan wixii warbixin cusub oo ku saabsan COVID-19, oo loo yaqaan 'Coronavirus.' Waqtigaan, waxay umuuqataa in qof ama shakhsiyaad ku sugan Magaalada New York laga helay fayriska, in kastoo Xarunta Xakamaynta Cudurada (CDC) ay ku kalsoontahay in dadka Mareykanka badankood ay qatar yar u leeyihiin qaadiska cudurka.

"Tani waa xaalad si dhakhso ah isu beddelaysa," ayay tiri Wakiilka Caafimaadka Dr. Gale Burstein ee [Erie County Department]. "Waxaan maalin kasta ka shaqeyneynaa, si joogto ah, gudaha iyo kuwa wada shaqeynta naga dhaxeyso, bixiyeyaasha daryeel caafimaad iyo gobolka." (Xigasho Buffalo News 2-27-20.)

Si kastaba ha noqotee, iyada oo ay bixiyeen ogeysiisyadii dhowaan ay soo saareen Xarumaha Xakameynta Cudurrada (U.S Centers for Disease Control) in korona fayriska "Coronavirus" ay faafi karto - iyo in xaaladaha hargabka si joogto ah loo soo sheego - waxaan rabnay inaan idinla wadaagno wixii macluumaad dheeri ah ee la xiriiira talaabooyinka degmada dugsiyada ay qaadeyso iyo sidoo kale tillaabooyinka adiga qaadi karto caawinta si looga hortago faafitaanka fayraska.

Boggan Websaydhka BPS (buffaloschools.org) ayaa dib u cusbooneysiin doonaa marka macluumaadka cusub ama tilmaamo ay bixiyaan saraakiisha caafimaadka dadweynaha la helo. Waad ku mahadsan tahay taageeradaada iyo iskaashigaaga maadaama aan ka wada shaqeyneyno sidii aan u wadi lahayn jawi waxbarasho caafimaad leh.

BPS WAXA AY SAMEYNAYAAN

Dugsiyada Dadweynaha Buffalo – BPS waxay xiriir joogto ah la leeyihiin qeybta Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka Erie iyo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Gobolka New York, waxaana raacnaa tilmaamaha iyo dhaqamada ugu wanaagsan ee aan ka helno hay'adahaas iyo Xarumaha Xakamaynta Cudurrada (CDC) markay timaado ka jawaabcelinta walaacyada caafimaadka bulshada, oo ay ka mid yihiin korona-fayriska iyo hargabka faluuga (flu).

Dugsiyada Dadweynaha Buffalo – BPS iyo saraakiisha caafimaadka gobolka waxay si wada jir ah u wadi doonaan la socodka xaaladaha. Haddii xaaladaha New York isbeddelaan, degmadu waxay talo ka sugi doontaa NYS iyo CDC waxayna raaci doontaa tilmaamaha iyo wixii talo ah ee la cusbooneysiiday

WAXA ADIGA SAMAYN KARTO

Waxaa jira wax aad sameyn karto. Dib u fiiri nadaafada wanaagsan ee qoyskaaga si aad uga caawiso badqabkooda. Tusaalooyinka qaar ka mid ah nidaamyada caadiga ah, tallaabooyin looga hortago ee maalin kasta si loo yareeyo faafitaanka fayraska waxaa ka mid ah:

- **Haddii arday ama xubin shaqaalaha ka mid ahi uu jirrado, yuusan imaan dugsi.**
 - Afkaaga ku dabool gacanta kore ama masarka waraaqda (tissue) marka aad qufacayso ama hindhiseyso
 - Gacmahaaga ku dhaq saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 sekan. Isticmaal gacmo nadiifiye alkolo leh oo ka kooban ugu yaraan 60% aalkolad haddii saabuun iyo biyo aan la heli karin.
 - Iska ilaali inaad gacmahaaga oo aan la dhaqin ay taabtaan, indhahaaga, sankaa, iyo afkaaga.
 - Ka fogow xiriir dhow inaad la yeelato dadka jiran.
 - Nadiifi oo jeermiska ka baabi'i walxaha had iyo jeer dushooda la taabto.
-

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Kala soco kana raadso wixii macluumaad ah oo fayriskan ku saabsan iyo xaaladaha ilo khabiiro lagu kalsoonaan karo sida:

- [World Health Organization](#)
- [U.S. Centers for Disease Control and Prevention](#)
- [Erie](#) County Department of Health
- [New](#) York State Department of Health